# Ka ilaali ilmahaaga KOFID-19

Tallaalka KOOFID-19 waxaa hadda heli kara caruurta jira 6 bilood iyo wixii ka weyn.

Xarunta Xakamaynta iyo ka Hortagga Cudurada waxay kula talinaysaa dhammaan caruuta jira 6 bilood iyo wixii ka weyn in ay is tallaalaan.

Tallaalka KOFID-19 waa ammaan, lacag la'aan, caruurtana wax tar ayuu u leeyahay. Tallaalka waa la daraaseeyey inta aan caruurta iyo kurayada lagula talin qaadashadiisa  waxaana la ogaaday in uu badqab leeyahay.

Sida dadka waa weyn oo kale, caruurta iyo kurayada da' kasta jira waxaa ku dhici kara xanuun ay KOFID-19 ka qaadeen, sidoo kale waxyeelo waqtiga dhow iyo kan fog ayuu u geysan karaa waxayna ku fidin karaan cudurka dadka kale.

Ma jiro qaab kal hore loogu sii sheegi karo caruurta iyo kurayada in KOFID-19 uu saameyn doono. Kuwa qaba xaalado caafimaad oo gaar ah ama kuwa uu jir difaacoodu liito waxay u badantahay in ay la jiradaan KOFID-19. Xattaa caruurta caafimaadka qaba way la xanuunsan karaan cudurkaan. Sababtaas ayuu tallaalka muhiim u yahay.

Xattaa caruurta uu horay KOFID-19 ugu dhacay waxaa habboon in ay tallaalka qaataan waayo wuxuu siinayaa difaac adag waa macquul in uu qofka qaado KOFID-19 marar badan, sidoo kale macnaheeda maahan haddii uu qofka horay ugu dhacay cudurkaan in marka xigta uu noqon doono mid fudud.

Tallaalka loo qaato cudurka KOFID-19 ma sababo xannuunka KOFID-19. Waxyeeladiisa waxaa ka mid ah cudud xanuun ama qandho fudud, waa wax caadi ah tallaalka kadib wuuna iska dhamaanyaaa maalin ama labo gudahood.

Tallaalka KOFID-19 wuxuu ka difaacaa qoysaska iyo bulshada cudurka KOFID-19. Ilmahaaga wuxuu u baahan doonaa dhammaan kuurooyinka tallaalka KOFID-19 ee lagu taliyey si aad u hesho difaac adag, waxaa sidoo kale ku jira tallaalka xoojiyaha.

Tallaalka dadka da'doodu yartahay loogu tala galay waa kuuro yar marka la bar-bardhigo caruurta da'ahaan weyn iyo dadka waa weyn. Kuurada tallaalka waxaa lagu qiyaasaa da'da ilmaha ee laguma qiyaaso miisaankiisa iyo cabbirkiisa.

Haddii ilmahaaga uu leeyahay daryeele/daryeel bixiye caafimaad, waxay ku siin karaan macluumaadka aad u baahantaay waxayna sidoo kale kaa caawimi karaan in ay ballan kuu qabtan si aad u qaadato dhammaan kuurooyinka lagu taliyey kolka aad qaadanayso kuurada koowaad.

Caruurta way qaadan karaan tallaalka KOFID-19 iyo tallaalada kale ay u baahan yihiin isla hal booqasho. Haddii ilmahaaga uusan haysan daryeele/daryeel bixiye caafimaad, waxaan booqan kartaa mn.gov/vaxforkids si aad u hesho xog dheeri ah una baarto xarumaha tallaalka ee kuu dhow. Waaxda Caafimaadka Minnesota Khadka KOFID-19 wuxuu diyaar u yahay in uu ka jawaabo su'aalaha, sidoo kale waxaa jooga dad kugula hadlaya afaf badan.  Khadka waxaa ka wici kartaa 1-833-431-2053.

Booqo website ka Waaxda Caafimaadka Minnesota si aad u hesho macluumaad ku saabsan Caafimaad raqiis ah ama si aad u hesho caymis caafimaad (www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/materials/lowcost.html) oo afaf badan ku qoran.

Minnesota Department of Health
Communications Office
PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975
health.communications@state.mn.us

10/19/2022 (Somali)

*Si aad xogtan ugu hesho qaab kale, wac: 651-201-4989*